# Dukumentiga la filayo ee dugsiyada hoose ee degmada Västervik

**Tilmaamaha wada shaqaynta dugsiga, ardayga iyo guriga**

*" Awoodda nolosha, rabitaanka waxbrashada – xaq u yeelashad guusha"*

VÄSTERVIKS KOMMUN

2024-08-16

## Wada shaqaynta iyo ka qaybgalka dugsiga, ardayga iyo guriga

Ujeedada dukumentiga laga filayo waa in la caddeeyo wada shqaynta iskuulka, ardayga iyo guriga. Xeerka dugsiga iyo manhajka waxbarashada ayaa ah asaaska shaqada si aan u gaadhno himiladeena :Kartida nolosha, rabitaan waxbarasho – xaq u yeelashada guusha.

*'' Waxbarashadu waxa ay ujeedadeedu tahay in iyada oo lala kaashanayo guryaha, kor loogu qaado horumarka shakhsi ahaaneed ee dhammaan carruurta iyo ardayda si ay u noqodaan dad ay ka muuqato firfircooni, hal-abuur , karti ,mas'uuliyadnimo iyo muwaadinimo'' ( Xeerka iskuulka 2010:800, 1 Kap, `4 )*

Kalsoonida xidhiidhka ka dhexeeya ardayda, shaqaalaha dugsiga iyo maamulka ayaa muhiim noo ah sababtoo ah waxa ay gacan ka geysataa in ay ardaydu ka helaan oo ay wax badan ka bartaan dugsiga.

*'' Dugsigu waa in isaga oo la kaashanaya guryaha kor u qaadaa horumarka shakhsi ahaaneed ee ardayda oo dhan si ay u noqdaan kuwo firfircoon, hal abuur leh, karti iyo mas'uuliyad leh. Dugsigu waa in uu ku reebaa raad daryeelka qofka, tixgalinta iyo deeqsinimadiisa. Sidaa darteed shaqada waa in la sameeyaa iyada oo lala kaashanayo guryaha. '' ( Lgr 22 )*

Shaqada dugsigu waa inuu ardayda siiyo hagadda iyo dhiirigelinta ay uga baahan yihiin waxbarashadooda iyo horumarkooda shakhsi ahaaneed. Waxa aan ka shaqeyneynaa in aan hubinno in ardaydeenna, iyada oo laga amba qaadaya xaaladahooda, si ay u kobcin karaan sida ugu macquulsan iyada oo la raacayo yoolalka manhajka. Annaga waxa muhiim innoo ah in ardaydu ay helaan aqoon dhammaan maadooyinka oo dhan iyo in ay ka qayb qaataan oo ay saameyn ku yeeshaan waxbarashada.

*'' Ujeedka dugsigu waa in arday walba dadaalkiisa iyo ka qayb-galkiisa uu ku saleeyo awoodihiisa uuna xil iska saaro waxbarashadiisa iyo sidii uu uga qayb qaadan lahaa jawiga shaqo ee wanaagsan, uuna ixtiraam iyo xushmayn u muujiyaa shaqaalaha dugsiga iyo ardayda kale ee qaybta ka ah wadar mas'uuliyeedka.'' ( Lgr 22)*

## Ardayda iyo waalidiintooduba waxa ay naga filan karaan haddii aannu nahay degmada Västervik ee dugsiyada hoose :

- In aanu u daryeelno ardayda si wanaagsan
- In aanu ardayda oo dhan ku qaabilno tixgalin, naxariis iyo xushmad iyo maamuus
- In aanu ka shaqayno horumarinta ardayga sida ugu habboon iyada loo eegayo yoolka manhajka
- In ardaydu dareemaan ka qayb qaadashada waxbarashada

### Waxa aan kaa filaynaa adiga oo arday ah :

- In aad tixgalisid kala kuwanaanshaha
- In aad raacdid xeerarka guud ee dugsiga
- In aad ka qaybqaadataa waxbarashada
- In aad qaadatid mas'uuliyaddaada waxbarasho kadib inta aad noqotay qof weyn oo qaan-gaadh ah

### Waxa aan kaa filaynaa adiga oo ah waalidka ardayga:

- In aad siisid ilmahaaga fursadaha uu ku guulaysan karo
- Ku kalsoonow dugsiga
- La samee xidhiidh iskuulka haddii aad wax walaac ah ama su'aalo ah aad qabtid.
- Ahow qof ku xidhan iskuulka si aad u heshid macluumaadka ku saabsan shaqada iskuulka
- War geli iskuulka haddii uu ilmahaagu ka maqnaanayo iskuulka oo uusan tagi karin

Si wadajir ah waxa aan rabnaa in aan siino ardaydeena -carruurtaada fursadaha ugu wanaagsan ee ugu fiican si ay ugu guuleystaan dugsiga.

Waxa aan rajaynaynaa wada shaqayn wanaagsan. Ku soo dhawoow dugsiyada hoose ee degmada Västervik iyo shaqaalahooda.

## Faahfaahinta la xidhiidhka XXXXX – skola

Telefonnummer till skola:

Besöksadress:

Telefonnummer till rektor:

Telefonnummer till skolledarassistent: